

Fariin ku socota dumarka Soomaaliyeed:

Amaan ku saabsan dumarka Soomaaliyeed: Gabay lagu sharfayo maalinta dumarka caalamka .

Waxaa qoray; Liban Obsiye

Sabti, Maarso 12,2011-10-16

Halka wiilasha ay walaalaha yihiin debeda ku cayaarayaan, iyadu waxay caawinaysaa hooyadeed.

Halka wiilasha ay walaalaha yihiin u diyaar garoobayaan cuntada, iyadu waxay u karinaysaa cuntadii.

Halkay wiilasha walaalaha dibada waxaabo xun xun ka samaynayaan, iyadu waxay mashquul ku tahay caawinta jaarka.

Taasi waa gabadh. Waa gabadha Soomaaliyeed.

Meesha ninkeedu maqan yahay, waxay la joogtaa caruurteeda.

Meesha ninkeedu jaadka cunayo, waxay u madhaysaa caruurteeda.

Meesha ninkeedu qaylinayo ee gurxamayo, waxbay baraysaa caruurteeda.

Meesha ninkeedu hurdo, waxbay baranaysaa.

Taasi waa Marwo. Waa Marwada Soomaaliyeed.

Marka ay nimanku dagaalamayaan, iyadu waxay wadaa nabadgelyo.

Markay nimanku iska maqan yihiin, iyadaa keenta wixii qoysku ku noolaan lahaa.

Halka nimanku hadlayaan, iyadu way soo dhigaysaa.

Markay nimanku wax dalbadaan, iyadu si deggan bay u keeni.

Halka nimanku muuqdaan, iyadu gadaashooday ku nooshahay.

Taasi waa hooyo. Waa Hooyadii Umada.

Dumarka Soomaaliyeed, budhcadbadeedu gaar ahaan waxay dhibaato ku tahay hooyooyinka, marwooyinka, gabdhaha iyo walaalaha bulshada Soomaaliyeed.

Doorqiina muhiimka ee korinta iyo kobcinta reerkiina ayay budhcadbadeedu dhib ku tahay. Danbiilyaashan budhcad badeedku waxay dhibaato wayn uu keeneen bulshadiina iyo dhaqalihiina iyo barbaarintii reekiina. Wax yaabaha ay sameeyaan waxay dhaawacday ganacsigii caalimiga ahaa, waxay dib u dhigaysaa maraakiibtii cuntada siday waqtigan ay cunto yaraantu jirto, taasi oo idinku adkaynayso sidii aad caruurtiina u quudin lahaydeen.

Waxay budhcadbadeedu qortaan ama diiwaan galin ku sameeyaan Nimankiina, wiilashiina iyo walaalihiin iyagoo u dira waxyaabo sharci daro ah. Taasi waxay dhibaato ku tahay idinka iyo caruurtiinii oo waayaya caawimadii aabahood hadii la dilo ama la qabto. Taasi waxa kale oo ay horseed u tahay nolol xun oo ah inay nimankaasi bartaan khamriga, maandooriyaasha iyo dhilaysiga.

Budhcadbadeeda waxaa kale oo ay dareemeen inay heli karaan gabdhihiina, walaalihiin inay kaxaystaan oo ay soo geliyaan wax yaabaha dhaqan xumada ah ee ay samaynayaan iyagoo ugu balan qaadaya dhaqaale iyo lacag.

Gabadh ku xidhan nin budhcadbadeed ah waxaan shaki ku jirin inay ku jirto nabadgelyo daro iyo khatar wadata khamri, maandooriye, iyo dumarka oo ay dhilaysi baraan. Guursiga budhcadbadeedku wax nabadgelya ah oo uu dumarka siinayaa majirto iyadoo nimankani ay yihiin dad aan karaamo lahayn oo ku tala galay inay ka tagaan dumarkooda iyo caruurtooda, oo ay ka tegayaan iyagoo og in cid caawisaa aanay jirin una jilicsan in laga faaiidaysan karo.

Dumarka Soomaaliyeed, idinka ayay si adag idiin taabanaysaa sharkan budhcadbadeedku gaysataan. Isticmaala doorqiina gaarka ee aad ku leedihiin bulshada Soomaaliyeed, idinka oo ah tiirkii qoyska sidii aad u ilaalin lahaydeen naftiina iyo ta caruurtiinaba, indinkoo ka waaninaya inay xidhiidh la yeeshaan budhcadbadeeda iyo shaqadooda.

Hadii aad hayso wax war ah oo ku saabsan dhaqdhaqaaqa budhcadbeedeedka oo aad doonayso inaad soo sheeqgto, fadlan la soo hadal Xarunta Maaraakiibta ee NATO **0044 1923956574** Telefoonka waxaa kaa qaadi doona qof ingiriisi ku hadlaya.